


Bakteeriyada qalajiyaha iska caabisa waxay khatar weyn ku yihiin caafimaadkeena

Isticmaal kasta ee qalajiye/antibiyootika waxay keentaa iska caabbin dawo. Ayadoo la isticmaalo qalajiye/antibiyootika markii run loogu baahdo baan ku joojin karnaa bakteeriyada qalajiyaha iska caabisa ee soo kordhaysa.



Ma rabtaa inaad sii ogaatid wax intaa dheer?



www.1177.se





www.antibiotikaellerinte.se




www.skyddaantibiotikan.se

Bakteeriyada ku jirta kaadida dadka waayeelka ah
- Maxaa dadkoo dhan qalajiye (antibiyootika) loo siin waayay?



Illaa iyo in gaaraysa kala waayeelka ah kaadidooda waxaa ku jirta bakteeriyo iyadoo aan wax dhib ah sababin





Laakiin haddii qofku uu dareemo daal, walwal ama wareersan yahay?

Ayaamihii hore waxaa loo arki jiray inuu keenay caabuq/ekfashin kaadimareenka ah, laakiin maantay waxaan ognahay in dhibka badanaa ay waxyaalo kale sababaan.

Laakiin haddii qofku aw dareemo inuu jirran yahay oo caafimaad darro xun aw dareemayo?

Waxaa muhiim ah in daryeelka caafimaadka sameeyaan qiimayn dhamaystiran si aysan nooga hoos bixin waxa keenay xanuunka ama aynaan si khalad ah ugu turjuman inuu yahay caabuq/ekfashin kaadimareenka ah.



Sidee baa lagu ogaan karaa inuu yahay caabuq (ekfashin) kaadimareenka ah, markaas?

Markii xanuunku aw yahay mid kugu cusub, sida xanfaf markaad kaadinasid ama kaadida oo dhib kaaga soo baxda waxaa sababi kara caabuq/ekfashin kaadimareenka ah oo markaas qalajiyaha/antibiyootika badanaa way caawisaa.

Tijaabo kaadi baa la qaadaa markii aw jiro shaki cad oo ku saabsan inuu jiro caabuq/ekfashin kaadimareenka ah.

Qalajiye/antibiyootika ma iska qori kartaan miyaa, si loo hubsado?

Ka bukaan ahaan waxaa muhiim ah inaan la siin qalajiye/antibiyootika ayadoo aan loo baahnayn. Qalajiyaha/antibiyootikada waxay keeni kartaa saamayn xun sida shuban oo kale.

Qalajiyaha/antibiyootikada waxay dishaa bakteeriya waxtar difaac ah inoo leh oo ku jirta kaadimareenka iyo mindhicirrada labadaba.

Waxaa teeda kale halis loo galayaa in lasii caawiyo bakteeriyada qalajiyaha/antibiyootikada iska caabisa. Bakteeriyadaas waxay ayaguna markooda keeni karaan caabuqyo/ekfashino ay adagtahay in la daaweeyo.

